


## Register

- 2) När du hyr din lägenhet
- 5) Städning av lägenhet
- 7) När du ska flytta
- 9) Flyttstädning
- 10) El och värme
- 12) Grannar och hänsyn
- 13) Sopsortering
- 15) Tvättstugan
- 16) Brandvarnare
- 17) Omsorg av din lägenhet
- 18) Skadedjur - Rökning
- 20) Spis och fläkt



- 2) Markaad guri ijaaratiid
- 5) Nadiifinta gurigaaga
- 7) Markaad guriga ka guuraysid
- 9) Nadiifinta guriga markaad ka guuraysid
- 10) Korontada iyo kulaylinta
- 12) Deriska iyo tixgelintiisa
- 13) Qashin kala gurid
- 15) Guriga dharka lagu dhaqdo
- 16) Dab ka dige
- 17) Xannaanaynta gurigaaga
- 18) Cayayaan- Sigaar cab
- 20) Cunto kariye iyo marawaxad

	<p><b>När du hyr din/familjens lägenhet. Markaad guri ijaaratiid</b></p>	
<p>Att betala hyran i tid är en mycket viktig sak i Sverige.</p> <p>Kontraktet Du skriver under ska du spara, det är ett viktigt dokument.</p>		<p>Inaad ijaaraka waqtigiisa ku bixisaa waa muhiim waddankan.</p> <p>Heshiiska Aad saxiixday waa inaad xafidataa, aad ayuu muhiim u yahay.</p>

Du betalar alltid i förskott, senast i slutet av varje månad.

Teckna en hemförsäkring.



Ijaarka waad qaddimasyaa, bixi ugu dambayn bil walba dhammaadkeeda.

Heshiiska caymiska gurigana saxiix!



Om du inte betalar hyran kan du bli vräkt.

Det är 3 månaders uppsägning av en lägenhet i Sverige. Detta gäller även bredband, internet.



Guriga waa lagaa saarayaa haddaadan ijaarka iska bixin.

Xeerka Iswidhan waa in 3 bilood ka hor la sii sheego marka guriga laga guurayo. Sidoo kale xaraaradda internetka.

<p>DU är själv ansvarig över lägenheten, det du förstör får du betala.</p> <p>Hysesvärden har besiktat lägenheten innan du flyttade in.</p>		<p>ADIGAA ka mas´uula guriga, wixii aad jebisey waa inaad bixisaa.</p> <p>Kireeyuhu guriga waa kantaroolay intaadan u soo guurin.</p>
<p>Det finns lägenheter som har både varm och kall hyra, fråga vad som gäller!</p> <p>Om du vill vädra, gör det en kort stund.</p>		<p>Guryaha qaar waxaa lagu ijaara kulayl qaarna qabow, iska ogow kaagu wuxuu yahay!</p> <p>Dariishaduhu ha xirnaadaan. In yar hawada guriga fur haddaad.</p>

## Städning av din lägenhet Nadiifinta gurigaaga

Försök att plocka bort från golvet varje dag, sopa upp smuts, då skyddar du golvet.

Städning av lägenheten bör du göra varje vecka, damsug och damtorka.

Var noga i badrummet där trivs många bakterier.



Isku day inaad maalin walba dhulka xaaqdid, taasi waxay u roontahay guriga.

Asbuuc kasta waa in guriga la masaxo, habaasnuuge la geliyo oo busta laga jafo.

Aad uga taxaddar musqusha, meeshaas jeermis badan ayaa ku jira.

Diska varje dag, låt det torka innan du ställer in det i skåpet.



Weelka xal maalin kasta oo qallaji intaadan khaanadda gelinin.

Putsa fönster ska du göra minst en gång varje år. Och alltid när du flyttar.

Du får inte skaka mattor direkt utanför din lägenhet, eller på balkongen.



Dariishadaha waa inaad masaxdid uga yaraan 2 goor sannadkii. Iyo mar kasta oo aad guuraysid.

Katiifadaha kuma jafi kartid guriga illinkiisa, ama daaradda dibedda.

Ta reda på vilket golv du har i din lägenhet, vissa golv får du inte skura!



Isku day inaad baratid cagdhigga gurigaaga, cagdhigyada qaarkood lama xoqi karo!

	<p><b>När du ska flytta eller byta lägenhet Marakaad guriga ka guuraysid ama beddelanaysid</b></p>	
<p>Kontakta hyresvärdens och meddela skriftligt att du kommer att flytta, denna ska du även skriva under. Det gäller även om du har internet.</p> <p>Detta kan du hos många även göra via hyresvärdens hemsida.</p>		<p>Qoraal aad saxiixday ku war geli shirkadda guriga leh una sheeg inaad ka guuraysid. Sidaas oo kale u war geli kuwa internetka haddii uu kuugu jiro.</p> <p>Wargelinta waxaad ku samayn kartaa bogga internet ee shirkadda guriga leh.</p>
<p>Du betalar hyran i tre månader från det att du sagt upp lägenheten.</p> <p>Du måste även veta när du får flytta in i din nya lägenhet.</p>		<p>Saddex bilood oo dambe ayaad kirada bixinaysaa laga bilaabo maalintaad caadka guriga dhiibtey.</p> <p>Xataa waa inaad ogtahay markaad guriga cusub u guuraysid.</p>

Hyresvärden kommer att jämföra lägenheten hur den ser ut sedan du städat

Eventuella skador får du betala för.



Shirkaddu waxay kaa eegaysaa sida gurigu yahay ka dib markaad nadiifisay.

Haddii dhaawac aad gaarsiisey guriga adiga ayaa bixinaya.

Meddela ditt elbolag det datum du kommer att flytta.

Berätta även vart du ska flytta, vilken adress. Detta kan du på. [www.skatteverket.se](http://www.skatteverket.se)





Ku wargeli shirkadda korontada taariikhda aad guureysid.

Una sheeg adareska aad u guureysid, cinwaanka. Halkan ka gal [www.skatteverket.se](http://www.skatteverket.se)



<p>Kontakta ditt försäkringsbolag och meddela vart du kommer att bo.</p> <p>Även detta kan du göra via hemsida eller telefon.</p>		<p>La xiriir shirkadda caymiska oo ku war geli meeshaad degi doontid.</p> <p>Arrintan bogguriyeedka ama taleefanka ayaad ka samaysan kartaa.</p>
	<p><b>Att städa när du flyttar ut från din lägenhet. Nadiifinta guriga markaad ka guuraysid.</b></p>	
<p>Du ska städa hela lägenheten. Prata med din hyresvärd vilka regler som gäller för dig. Alla hyresvärdar har lätta dokumnet som du ska följa.</p> <p>OM du inte städar ut ordenligt kan du bli ersättningsskyldig för att du inte gjort som du ska.</p>		<p>Guriga oo dhan waa inaad nadiifisaa. La hadal shirkadda guriga oo weydii qodobbada ku khuseeya. Shirkaduhu waxay leeyihiin qodobbo la raacoo.</p> <p>Haddii aadan guriga si fiican u nadiifin waxaa lagugu soo dallacayaa lacagta lagu nadiifiyo.</p>

<p>Töm lägenheten, och förråden. Torka ur alla skåp. Rengör ugn, kyl, frosta av frysen. Dra fram spisen och rengör bakom den. Rengör fläktens filter. Rensa alla avlopp. Putsa fönstren. Torka av alla lister.</p>		<p>Guriga iyo maqaasiinka alaabta ka guro. Qallaji khaanadaha oo dhan. Nadiifi foornada/furinka, tallaagadda, barafkana ka dhalaali. Soo jiid cunta kariyaha och nadiifi gadaashiisa. Nadiifi shaandhada/shabaqa marawaxadda. Nadiifi tuubooyinka oo dhan iyo godashooda. Tirtir dariishadaha oo dhan. Qallaji laabatooyinka oo dhan</p>
	<p><b>El och värme</b> <b>Korontada iyo kulaylinta</b></p>	
<p>I ditt hyreskontrakt så fram går det om det är varm eller kall hyra som du hyr, och vad som ingår i din hyreskostnad. Det är olika och beror på av vem du hyr. Fråga alltid. Tänk på att om dina gardiner hänger för elementet så kommer inte värmen ut i rummet.</p>		<p>Heshiiska ijaarka ayay ku qoran tahay haddii guriga lagaaga kireeyey qabow ama kulayl, iyo waxa la socda ijaarkaad bixixinaysid. Way kala duwan tahay waxayna ku xiran tahay cidda aad wax ka kiraysanaysid. Had iyo jeer weydii. Ku feker in haddii daahyadaadu daboolaan kululeeliyaha aan kulku qolka soo gaaraynin.</p>

<p>Detta är en variant av säkringar.</p> <p>Om det blir svart i din lägenhet, eller att någon elektrisk amskin inte fungerar, kan det vara en säkring som varnar.</p> <p>Den löser ut när det är något fel.</p> <p>Det enda du behöver göra är att föra tillbaka knappen</p>		<p>Kani waa nooc ka mid ah fiyuusyada jira.</p> <p>Haddii gurigu mugdi noqdo, ama makiinadaha korontadu shaqayn waayeen, waxaa dhici karta in fiyuusku digniin bixinayo.</p> <p>Botonka ayaa hoos u dhacaya.</p> <p>Marka botonka kor u celi ka dibna caadi ayuu u shaqaynayaa.</p>
<p>Dessa ska du själv köpa och byta ut om det går sönder. Det finns olika starka, enklast är det att ta med sig den som gått sönder till affären.</p>		<p>Fiyuuska noocan u samaysan adiga ayaa soo iibsanaya oo beddelaya marka mid xumaado. Waana noocyo kala duwan, sii qaado kan xumaaday oo tus dukaanka.</p>

	<p><b>Grannar. Hänsyn till andra. Deriska. Tixgelinta dadka kale</b></p>	
<p>Hålla bullret nere hela tiden så att du inte stör dina grannar. Speciellt viktigt att vara tyst mellan klockan <b>22-07</b>.</p> <p>Kom även ihåg att du som förälder har ansvar för tillsyn vad dina barn gör utomhus. Det finns alltid en lekpark som du kan besöka fråga i din kommun vart den ligger. De leksaker som finns ute äger någon, fråga alltid innan dina barn lånar.</p>		<p>Had iyo jeer yaree buuqa si aadan u dhibin deriskaaga. Waxaa aad muhiim u sii ah in la aamuso inta u dhexeeya <b>10 fiidnimo</b> illaa <b>7 subaxnimo</b>.</p> <p>Ka waalid ahaan waxaad kaloo mas' uul ka tahay la socodka waxa ilmahaagu ka qabanayaan dibadda. Waxaa jira beero carruurta lagu cayaarsiiyo ood booqan kartaan, weydii degmada meesha ay ku yaallaan. Lucbadaha dibadda yaal dad ayaa iska leh, weydiiso in ilmahaagu ku cayaari karaan.</p>
<p>Vintertid så skottar du framför din egen dörr. En sandhink ska finnas för att sanda vid halka.</p>		<p>Xilliga qaboobaha adigaa iska xaaqaya barafka albaabkaaga yaal. Baaldi ciid ah ayaa lagu dhigayaa xagga hore si aad isaga ciidayso haddii siibasho jirto.</p>

**Sopsortering  
Qashin kala guris**

Vi är duktiga på att sopsortera och vill att Du också ska göra det. I varje kommun så finns det stationer där du kan lämna in allt du inte kan äta.  
Gör det redan hemma i lägenheten så slipper det se ut som bilden nedan.



Iswidhan waxaan ku fiican nahay kala gurista qashinka adigana waa inaad sidaas oo kale samaysid. Degma kasta waxay leedahay goob aad geyn kartid wixii aadan cuni karaynin. Haddaba qashinka guriga ku soo kala gur oo ha yeelin sida sawirka ka muuqata.

Dessa stationer finns oftast i anslutning till en affär, just för att det ska vara lätt att kasta bort det som kan återvinnas och bli nya produkter eller det som är farligt för miljön.  
Skapa egna lösningar för sortering i lägenheten och ta med dig det som Du inte får kasta bland soporna.




Goobaha qashinka loogu talo galay waxay inta badan ku dhow yihiin dukaamada, si ay u sahlanaato kala gurkooda, waxyaabaha dib loo habayn karo lagala baxo iyo in waxyaabaha dhibka u keenayo degaanka laga saaro. Guriga ku diyaarso weelal lagu kala guro waxa aan qashinka lagu dari karinna soo qaad oo meeshaas keen.

Matolja får du INTE spola ner i avloppet!  
Det ska med sopbilen men i samma  
förpackning som du köpte den i, eller i gamla  
mjölkpaket.



Saliidda KUMA shubi kartid meesha weelka  
lagu dhaqo!  
Weelkaad ku soo gadatay ku celi ama ku shub  
baakadda caanaha oo gee meesha qashinka.

	<b>Tvättstugan</b> <b>Guriga dharka lagu dhaqdo</b>	
<p>Det finns alltid en tvättmaskin och tork möjligheter när du hyr en bostad. Men det är olika på det är för varje lägenhet, i en del lägenheter så finns tvättmaskinen i lägenheten, i andra så delar med andra. Fråga vad som gäller när du skriver på kontraktet.</p> <p>När du har dina tvättmöjligheter i din egen lägenhet kan du göra det ombonat och behöver inte städa efter varje gång du tvättat.</p> <p>Om dina tvättmöjligheter är i en gemensam tvättstuga så <b>MÅSTE DU</b> städa efter dig varje gång du tvättat.</p> <p>Det finns alltid instruktioner om vad du ska göra. Fråga annars hyresvärden.</p>		<p>Markaad guri kiraysanaysid waxaa mar walba jira fursad qasaaladeed iyo qallajiso. Waase ku kala duwan yihiin guryuhu, guryaha qaar makiinaduhu waa dhex yaallaan, qaarna dad kale ayaa lala wadaagayaa. Markaad caqadka saxiixaysid weydii midka gurigaagu leeyahay.</p> <p>Haddii makiinaduhu guriga ku dhex yaallaan uma baahnid inaad mar walba ood dhar dhaqatiba xaaqdid. Adiga ayaa u madax bannaan inaad markaad rabtid hagaagsatd.</p> <p>Haddiise qasaaladuhu ay yihiin kuwo dadka ka dhexeeya WAA QASAB inaad mar walba nadiifisid ka dib markaad ku dhaqatid. Waxaa jira warbixinno kuu tilmaamaya waxa lagaa rabo inaad samaysid. Haddii kale weydii kuwa guriga leh.</p>

<p>Det finns olika sätt att BOKA tvättid. Tvättavla är vanligast.</p> <p>Respektera TIDEN. Detta är ett område där det alltid finns många som blir irriterad på att man inte håller sin tvätt tid.</p> <p>Torktummlaren är mycket viktigt att du frågar hur du ska rengöra den, det kan variera från maskin till maskin vart filtret sitter. VIKTIGT att rengöra den varje gång du använt den.</p>		<p>Siyaabo kala duwan ayaa loo xejistaa xilliga dhar dhiqidda. Nooca sabuuradda u eg ayaa ugu badan.</p> <p>Xurmee WAQTIGA. Waa meelaha ugu daran oo dadka in badani dhibsadaan qofka aan ku ekaanin saacadaha uu xaqa u leeyahay.</p> <p>Aad ayay muhiim u tahay inaad ogaatid sida loo nadiifinayo qallajisada, makiinaduhu waa kala duwan yihiin. Waana muhiim AAD AH inaad nadiifisid mar kasta oo aad isticmaashid.</p>
	<p><b>Brand/brandvarnare</b> <b>Dab/dab ka dige</b></p>	
<p>I varje lägenhet ska det finnas brandvarnare. Dessa är helt tyst och kommer att tjuta om den känner av rök.</p> <p>Börjar den att låta så måste du byta batteri.</p>		<p>Guri kasta waxa ku jira dab ka dige. Wax cod ah ma leh laakiin wuxuu cod qaylo dheer ah bixinayaa marka uu qiiq dareemo.</p> <p>Hadduu cod goos goos ah bixiyo ka beddel beteriga.</p>



<p>DU får inte förvara saker ute i trapphuset. Varken stora eller små saker!</p>		<p>Alaab ma dhigi kartid jaranjarada dibedda ee guriga. Ama alaabo yar yar ha ahaato ama mid waaweyn!</p>
	<p><b>Omsorg om din lägenhet Xannaanaynta gurigaaga</b></p>	
<p>Du är ansvarig för din lägenhet, du har fått tre nycklar och när du flyttar ska du lämna tillbaka dem. Om du tapper en nyckel så vill många hyresvärdar byter cylinder, något du själv får betala. Det finns möjlighet att köpa till nya, fråga hur du ska göra.</p> <p>Om du vill sätta upp något på väggen så använd häftstift INTE tejp.</p>		<p>Adigaa ka mas'uula gurigaaga, saddex fure ayaa lagu siiyey, waa inaad dib u soo cilisaa markaad guuraysid. Shirkadaha guryaha qaar badan ayaa beddela tuubada furuhu galo haddii hal fure kaa lumo, adiga ayaana bixinaya kharashkaas. Weydii haddaad furayaal dheeri ah rabtid inaad iibsan karto iyo in kale.</p> <p>Haddaad rabtid inaad derbiga wax ku dejisid ha isticmaalin koollo ee isticmaal musbaarrada yar yar ee sawirka ka muuqda.</p>

För att skona tapeterna, köp en sänggavel.



Sariir madax leh iibso si aan derbigu u xoqmin.

**Skadedjur – Rökning  
Cayayaan – Sigaar cabbid**

Om du upptäcker någon ohyra i lägenheten meddela hyresvärden **genast!**  
Skadedjur kan bland annat vara:  
Myra, vägglus, kackerlacka.





Haddaad guriga ku aragtid cayayaan waa inaad si degdeg! ah u wacdid kuwa guriga leh.  
Cayayaan wax dhaawaca waxaa ka mida:  
Quraanjo, Kutaan/dhiqle, Baramabaro.

Rökning är inte tillåten inne i lägenheten.  
Du kan röka utanför, men gå en bit från  
lägenheten.  
Kasta **inte** fimparna på marken.



Lama oggola in sigaar guriga lagu dhex cabbo.  
Guriga bannaankiisa ayaad ku cabbi kartaa,  
laakiin waa inaad guriga ka durugtaa.  
Haashka **ha ku tuurin** dhulka.

	<b>Spis och fläkt</b> <b>Cunto kariye iyo marawaxad</b>	
<p>Spisen kan se olika ut, och kräver olika rengöring, fråga alltid din hyresvärd om du har funderingar på vad som gäller där du hyr. När du flyttar så är det viktigt att du rengör hela spisen, även diskar plåtarna i ugnen.</p>		<p>Cunto kariyayaashu waa kala duwan yihiin, qaabab kala duwan ayaana loo nadiifiyaa, weydii qofkaad guriga ka ijaaratay si aad u ogaatid qaabka ku habboon kan yaalla gurigaad kiraysatay. Waa muhiim inaad nadiifisid cunto kariyaha oo dhan markaad guriga ka guuraysid, xataa suxuunta wax lagu foorneeyo waad dhaqaysaa.</p>
<p>Fläkten är ofta kopplad till ventilation och den kräver rengöring, där fastar mycket fett från matlagning och fungerar sämre om den är smutsig. Be den som hyr ut visa dig hur du rengör den.</p>		<p>Marawaxaddu waxay inta badan ku xiran tahay hawo laliyaha oo u baahan in la nadiifiyo, maxaa yeelay waxaa qabsada subag ka baxa cunto karinta sidaas darteed si fiican uma shaqaynayo hadduu wasakh yeesho. Kuwa guriga kaa kireeyey weydiiso inay ku tusaan sida loo nadiifiyo.</p>

